# Golaha Wakiillada

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### *Golihii 5$^{aad}$ ee Wakiillada, Fadhigii 15$^{aad}$ ee Kal-fadhiga 6$^{aad}$*

***Wakhtiga 09:52* AM** ilaa **11:22 Am**
***Taariikhda: - Isniin 15 October 2023***

**Guddoonka: -** Md. Yaasiim Maxamuud Xiir (Faratoon)

**Quraanka: -** Md. Sh. Siciid Sockeeye

**Ajandaha Fadhiga:**- Dooda Xeerka Ciidanka Dab-damiska Qaranka.

**Md. Cabdikariin Aadan Cali (4min, 28sec):** – Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiye waad mahadsan tahay, Mudanayaalna sidaas oo kale. Run ahaan, xeerkan waa xeer aad iyo aad u muhiim ah, kuna saabsan badbaadada nolosha iyo hantida muwaadiniinta dalka ku nool.

Haddii aan ku horrreeyo magaca xeerka Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta, waxaan leeyahay wuu ila habboon yahay magac ahaan, marka laga reebo erayga "ciidan" oo u baahan in la qeexo. Waayo xeerarkii hore ee ciidamada kala duwan waxay ku hubaysnaayeen dab, sida uu xildhibaan Cabdikariin Meecaan sheegay. Halkan wuu ka duwan yahay, waayo waxa aynu isticmaalaynaa waa xoog badbaado oo damiya dababka kaca iyo waxyaabaha kale ee waxyeellada u geysan kara hantida iyo nolosha dadka, sida daadadka, dabaylaha, dad ceelal ku dhaca, guryo ku dumma, iyo waxyaabo kale oo halis gelin kara naftooda.

Marka laga hadlayo qaab-dhismeedka lagu qoray Taliye iyo Abaanduule, wali waxaad mooddaa in laga hadlayo sidii ciidamada kale ee dagaalka gala. Waxa fiicnaan lahayd in loogu yeedho ciidan lana qeexo waxa loola jeedo koox ama urur, balse in loo dhigo sida ciidan dagaal galaya aniga aragti ahaan ma habboona. Waxaanan soo jeedinayaa in halkaas darajooyinka laga dhigo sida ay u kala sarreeyaan shaqaalaha dawladda: A, B, C iyo D, tababar ahaanna ay u tababartaan si gaar ah oo la xidhiidha shaqadooda iyo sida ay u hawl-galayaan.

Arrimaha uu xildhibaan Meecaan ka hadlay ee ku saabsan soo dejinta qalabka, cusboonaysiinta, tababarada dadka ganacsatada ah, dadka guryaha waaweyn leh iyo hay'adaha dawladda, waxaan soo jeedinayaa in la siiyo liisan cid hawlahaas ka shaqaysa oo qalabka dab-damiska ee fudud soo dejisa, tababarna u samaysa cid kasta oo isticmaalaysa qalabkaas yaryar. Si aan loogu baahnayn in markasta la sugo dab-demiska inta uu soo gaadhayo, balse goobahaas uu joogo qof ama laba ku tababaran. Ganacsi kasta oo arrimahaas ka shaqaynayaa waa in uu helo shahaado, waana in aan cid gaar ah loo xidhin.

Sidoo kale, waxaan soo jeedinayaa in hay'addani noqoto mid shacab ah, isla markaana laga wareejiyo Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee ay hadda hoos timaaddo, loona wareejiyo Hay'adda U-diyaar-garowga Aafooyinka iyo Masiibooyinka Dabiiciga ah ee Qaranka.

**Md. Axmed Cabdi Ibraahin (Timo-jilic)** (4min, 28sec): – Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiye aad ayaad u mahadsan tahay. Marka hore, xeerkan waxa ku qoran in Golaha Wakiilladu uu garab istaagayo ciidan ahaan, miisaaniyad ahaan iyo wixii caawimo dibadeed ahba.

Qodobka 4aad farqaddiisa 2aad ee ujeeddooyinka xeerka, oo ka hadlaya in la helo xeer u gaar ah oo uu yeesho Ciidanka Dab-damiska Qaranku, xeerkaas oo qeexaya shaqooyinka iyo waajibaadka ciidanka ee la xidhiidha ka hortagga iyo xakamaynta dabka iyo wax ka qabashada dhibaatooyinka ka dhasha masiibooyinka kale ee dabiiciga ah. Marka aynu leenahay masiibooyinka dabiiciga ah, waxaa jirta hay'adda masiibooyinka dabiiciga ah ee uu qarankani leeyahay. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in si wada-shaqayn ay u yeeshaan hay'adaha dawladda, sida uu dhigayo xeerka kala-xadaynta xukuumadda, in aynu xaraf ku soo kordhino farqaddaas oo sheegaya maadaama ay kulmayaan aafooyinka iyo dhibaatooyinka kale ee dabiiciga ah, in Ciidanka Dab-damiska Qaranku la mid yahay ciidamada qaranka ee kala duwan, isla markaana Taliyaha Guud ee Ciidanka Dab-damiska, taliyeyaasha heer-degmo iyo taliyeyaasha qaybeedyaduba ay ka dalban karaan caawimo kasta oo ay uga baahdaan dhiggooda.

Ciidanka Dab-demiska Qaranku waxa uu yeelanayaa nidaam darajo ciidan iyo kala-sarrayn maamul, waxana xagga darajada la mid noqonayaa Ciidanka Booliska Jamhuuriyadda Somaliland. Halkaa gole ayaynu nahay, miisaaniyadda ayaanaynu ansixinaynaa. Miisaaniyaddaas aynu ansixinayno iyo talo ahaan wixii xeerar aynu soo jeedinayno iyo waxa aynu xeerka ku qoraynaa waa wax aad u wanaagsan.

Sidaa awgeed, miisaaniyadda headka ah 10.10.800 ee aynu ku ansixinay lacag dhan 19 bilyan, waa in 40% ka mid ahi noqdaan xuquuqda Ciidanka Dab-damiska Qaranka, halka 60%-ka soo hadhay ay noqdaan hawl-gallada kale ee ciidanka. Waxaanan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan;

**Jadwalka Mushaharka Ciidanka Dab-demiska Qaranka (CD/Q)**

| Darajada | Tirada | Mushahar (SLSh) | Wadar Xisaabeed (SLSh) |
|---|---|---|---|
| 0.1 Dable | 400 | 1,500,000 | 600,000,000 |
| 1 Alifle | 100 | 1,575,000 | 157,500,000 |
| 2 Alifle | 50 | 1,653,000 | 82,650,000 |
| 3 Alifle | 33 | 1,736,000 | 57,288,000 |
| 1 Xadhigle / Gcundho | 25 | 1,823,000 | 45,575,000 |
| 2 Xadhigle / GCdh | 12 | 1,914,000 | 22,968,000 |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 3 Xadhigle / GCNDH | 8 | 2,010,000 | 16,080,000 |
| 1 Xidigle | 6 | 2,110,000 | 12,660,000 |
| 2 Xidigle | 5 | 2,216,000 | 11,080,000 |
| 3 Xidigle | 4 | 2,326,000 | 9,304,000 |
| 1 Gaashaanle | 3 | 2,443,000 | 7,329,000 |
| 1/1 X. Gaashaanle Dhexe | 2 | 2,565,150 | 5,130,300 |
| 1/2 X. Gaashaanle Sare | 2 | 2,693,407 | 5,386,814 |
| 2 Gaashaanle Sare / Janan | 2 | 2,828,077 | 2,828,077 |
| **Wadar Guud** | **251** | | **1,035,779,191** |

Xog Guud

- **Miisaaniyadda guud ee Ciidanka Dab-demiska Qaranka:**
  **19,016,306,848 SLSh**
- **Mushahar & Gunno Sanadle ah:**
  **12,429,350,292 SLSh**
- **65.36%** mushaharka ka soo hadhay waxa loo qoondeeyay:
  **Operational / Project Costs**

Faallooyin (Remarks)

- Column **B**: Tirada guud ee Ciidanka Dab-demiska Qaranka (CD/Q)
- Column **C**: Mushaharka aasaasiga ah
- Column **D**: Wadarta mushaharrada dhammaan darajooyinka
- Mushaharka lagu daray **40%** waa bilowga mushaharka CD/Q
- Mushaharka Dablaha ilaa darajada ugu sarreysa:

**Darajo kastaa waxay wadataa 2.5% korodh**

**Qaab-dhismeedka Hoggaanka**

a) Taliye
b) Taliye ku-xigeen
c) Hoggaanno ay hoos yimaadaan waaxaha kala duwan ee ciidanka
d) Xarumaha Ciidanka Dab-demiska ee Gobollada iyo Degmooyinka

**Qodobka 8aad** Waxaan soo jeedinayaa in lagu daro **Farqad 8aad**, oo u dhigan sidan: *"Ka hirgelinta xarumo dab-damis magaalooyinka iyo degmooyinka dalka."*

Arrintan waxaa lagu kaabaya iyadoo la tixraacayo in aynu hore u ansixinay **101 degmo iyo 24 degmo oo soo-jeedin ah**, isla markaana miisaaniyadooda la ansixiyey, si aanay u noqon wax laga indho-tiro ama qarsooma. Farqaddan waxa kale oo lagu akhrinayaa si waafaqsan **Farqadda 14aad ee Qodobka 8aad**, iyo **Qodobka 4aad ee Xeerkan**, iyo sidoo kale **farqadaha Qodobka 18aad**, maadaama ay ka hadlayaan arrimo isku macne ah.

**Qodobka 9aad – Farqaddiisa 4aad** Waxaan soo jeedinayaa in farqadda 4aad loo habeeyo sidan: *"Waxay amar degdeg ah siin karaan shirkad kasta in ay damiso ama joojiso qaybaha ay dab-demintu khusayso, iyaga oo kula xidhiidhaya adeegyada isgaadhsiinta. Waxay jari karaan xadhkaha korontada ama wax kasta oo dabka dhalintiisa ka qayb qaadan kara, haddii ay dhacdo amar-diidmo, iyaga oo aan oggolaansho uga baahnayn mulkiilayaasha. Sidoo kale, waxay jabin karaan guri ama meherad haddii aan la helin furaha."*

**Isla Qodobka 9aad – Farqaddiisa 5aad** Farqadda **A** waa sida ay u qoran tahay, waxaana lagu darayaa **Xarafka B**, oo u dhigan sidan: *"Taliska Ciidanka Dab-demiska Qaranku waxa uu wada-shaqayn ka dalbanayaa maamulada wakaaladaha biyaha iyo Ururka Injineerada Somaliland, si loo diyaariyo naqshadaha suuqyada waaweyn iyo goobaha muhiimka ah, looguna rakibo biyo-xireenno, champers, iyo emergency water points, kuwaas oo si degdeg ah loogu xidhi karo qalabka dab-demiska (pumps) iyo terminallada biyaha."*

**Qodobka 9aad – Farqaddiisa 6aad** Waxaan soo jeedinayaa in lagu daro in: *"Korontada lagu isticmaalo xarumaha Ciidanka Dab-demiska looma xisaabinayo wax kharash ah, ha noqoto shirkadaha gaarka loo leeyahay ama kuwa dawladdu maamusho, maadaama ay ka mid yihiin xarumaha danta guud."*

**Qaybta Afraad – Maamulka Qodobka 10aad** waxaan soo jeedinayaa in lagu daro **Farqad 11aad**, oo u dhigan sidan: *"Golaha Wakiilladu waxa uu si joogto ah ula soconayaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Ciidanka Dab-demiska Qaranka dhinacyada shaqo, sharci, dhaqaale iyo shaqaale."*

**Qodobka 11aad – Taliyaha, Ku-xigeenka iyo Hoggaannada** Waxaan soo jeedinayaa in lagu daro **Farqad 4aad**, oo u dhigan sidan: *"Ka dib magacaabista Madaxweynaha ee xubnaha talisyada Ciidanka Dab-demiska Qaranka, Golaha Wakiilladu waa in uu ansixiyaa, si looga taxaddaro khilaafaad iyo qalalaase hore uga dhacay ciidamada qaranka."*

**Qodobka 12aad** Waxaan soo jeedinayaa in lagu daro **Farqad 7aad**, oo u dhigan sidan: *"Waa inuu musharraxu shantii (5) sano ee u dambeeyay ka shaqaynayey xarumaha Ciidanka Dab-demiska."*

**Qodobka 16aad – Diiwaanka Ciidanka Dab-demiska** Waxaan soo jeedinayaa in lagu daro **Xarafka 'H'**, oo u dhigan sidan: *"Xafiiska Diiwaanka Ciidanka Dab-demiska Qaranka ayaa ka masuul ah kaydinta iyo ilaalinta xogta ciidanka, xogtaas oo ay heli karaan guddiyada Golaha ee u xilsaaran (PAC) marka kasta oo loo baahdo."*

**Qodobka 27aad – Qalabka Dab-demiska** Waxaan soo jeedinayaa in lagu daro: *"Qalabka Dab-demiska ee CDQ soo iibsanayo waa in uu noqdaa mid tayo sare leh, laga soo iibsado shirkadaha ugu wanaagsan ee suurtagalka ah, isla markaana noqda qalab isku nooc ah si duug iyo cusubba ay isugu shaqayn karaan, spare-parts-kooduna u wada ahaado*

*mid isku mid ah. Mudnaanta waa in la siiyaa dalalka taageera gooni-isu-taagga Somaliland, sida Taiwan."*

**Qodobka 28aad** Waxaan soo jeedinayaa in lagu daro in: *"Hoos-u-dhigyada (workshops) booliska iyo gaadiidka dawladda ee gobol kasta iyo degmo kasta ay isticmaali karaan Ciidanka Dab-demiska Qaranka, iyagoo ka fulinaya dayactirka fudud ee gaadiidkooda."*

**Qodobka 29aad** Waxaan soo jeedinayaa in lagu daro **Xarafka 'T'**, oo u dhigan sidan: *"Ciidanka Dab-demiska Qaranku waxa uu heli karaa deymo, grants, iyo deeqo caalami ah oo la xidhiidha horumarinta adeeggiisa."*

**Qodobka 30aad** Waxaan soo jeedinayaa in lagu daro in: *"Xeer-nidaamiyeyaasha ay soo saarto Wasaaraddu ay nuqul ka mid ah la wadaagto Golaha Wakiillada, si Goluhu ula socdo xaaladaha dhaqaale iyo maamul ee ku salaysan xeer-nidaamiyeyaasha la soo saarayo."*

**Md. Abiibakar Siciid Cali (15Min, 09Sec):** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, wabihi nastaciini calaa umuuri-dunyaa wa-diin. Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, aad iyo aad ayaad u mahadsan tihiin, waxaanan taageersanahay in Goluhu sii shaqeeyo muddo toddobaad ah.

Haddii aan dooddii ku soo dhawaado, Mudanayaal, waxaan ka bilaabayaa magaca Xeerka, anigoo taageeraya soo-jeedintii Xildhibaan Siciid Jaamac ee ahayd **Xeerka Ciidanka Dab-damiska iyo Gurmadka Deg-degga ah**.

Qodobka 6aad ee xeerkan waxa ka muuqata in farqaddiisa 3aad iyo tan 5aad ay isku soo noq-noqonayaan, sidaa darteed waxaan soo jeedinayaa in farqadda 5aad meesha laga saaro, isla markaana farqadda 3aad lagu kordhiyo si waafaqsan Dastuurka.

Qodobka 7aad ee qaab-dhismeedka Ciidanka Dab-damiska, kuma jirto abaanduule; waa taliye iyo taliye ku-xigeen. Sidaa darteed, halka abaanduulaha lagu qoray waa sidii xeerka Xukuumaddu soo gudbisay ku qornayd loo daayo, guddiduna ka dhigtay abaanduule. Sidoo kale, xarafka "C" oo ah "Hogaano", waxaan soo jeedin lahaa in la isku xidho xarafka "C" iyo "D" lagana dhigo "hogaanada xarumaha ciidanka dab-damiska ee gobollada iyo degmooyinka".

Qodobka 10aad ee ka hadlaya masuuliyadaha iyo waajibaadka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, waxaan ku dari lahaa farqad cusub oo sheegaysa, maaddaama ay waajibaadka wasaaraddu tahay inay isku xidho degmada iyo ciidanka dab-damiska ee degmada, in la yidhaahdo: "Inay sameyso guddi heer degmo ah oo ka kooban shan xubnood oo kala ah Badhasaabka, Maayarka, Taliyaha Dab-damiska ee degmada, Taliyaha Booliiska degmada iyo Isu-duwaha Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Guryeynta."

Qodobka 11aad ee qabyo-qoraalkii la soo gudbiyay, guddidu sidiisii uguma soo darin. Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in qodobkaas farqaddiisii 2aad oo ahayd: "Ciidanka Dab-damisku waxa kale oo uu yeelanayaa hogaano iyo saraakiil kale oo uu magacaabo taliyuhu, kuwaas oo noqonaya madaxda waaxyaha kala duwan ee taliska ciidanka dab-damiska," laga beddelo, maaddaama ay u ekaanayso talis waaxyo loo samaynayo oo awooddu ku ururayso xarunta guud, lagana dhigo: "Ciidanka Dab-damisku waxa kale oo

uu yeelanayaa hogaano iyo saraakiil kale oo uu magacaabo taliyuhu, kuwaas oo noqonaya madaxda maamulka gobollada iyo degmooyinka ee ciidanka dab-damiska."

Qodobada shuruudaha, waxa la soo horreysiiyay shuruudaha lagu soo xulayo taliye ku-xigeenka si la mid ah sida loo soo hormariyay xilka taliye ku-xigeenka oo taliyuhu ka dambeeyo; sidaa darteed qodobadaas waa in la soo hormariyaa taliyaha.

Qodobka 15aad ee xilka iyo waajibaadka taliye ku-xigeenka, waxa lagu soo koobay laba farqadood. Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro farqad 3aad oo u dhiganta: "Inuu taliyaha kala taliyo shaqooyin kala duwan ee uu ciidanka dab-damiska u hayo."

Sidaas oo kale, Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, maaddaama ay jiraan hogaano ka masuul ah gobollada iyo degmooyinka marka loo eego ciidanka dab-damiska, ugumana qorna xeerka wax waajibaad ah oo ay leeyihiin, sidaa darteed waxaan soo jeedinayaa in loogu daro qodob dheeraad ah oo ka hadlaya xilka iyo waajibaadka hogaamada gobollada iyo degmooyinka ee CD, kaas oo u dhigan sidan:

Xilka iyo waajibaadka hogaamada ciidanka dab-damisku waa:

1. Fulinta tabaha (strategies) lagu hormarinayo ciidanka dab-damiska ee degmada.
2. Maamulka iyo isku-dubaridka hawlaha shaqo iyo hawl-galinta ciidanka dab-damiska ee degmada.
3. Diyaarinta sidii ciidanka dab-damiska ee degmadu deg-deg ugu jawaabi lahaa dababka iyo masiibooyinka kale ee yimaada.
4. Ilaalinta iyo dayactirka gaadiidka kala duwan ee ciidanka dab-damiska ee degmada.
5. U soo gudbinta warbixinno taliyaha ciidanka ee heer degmo.
6. Iyo u soo gudbinta qorshaha miisaaniyadda iyo sidoo kale xisaab-xidhka miisaaniyadda la isticmaalayo.

Qodobka 18aad ee diiwaanka ciidanka dab-damiska, farqaddiisa 2aad waxa ku qoran macluumaadka askariga ee la kaydinayo. Waxaan soo jeedinayaa in lagu daro:

- Da'diisa inta uu jiro,
- Jinsigiisa (lab/dhedig),
- Xaaladdiisa qoys (inuu qoys leeyahay ama kaligiis yahay),
- Miisaankiisa, maaddaama ay jiraan qodobo xeerka ka mid ah oo ka hadlaya miisaanka looga baahan yahay,
- Haddii dhaawacyo soo gaadheen,
- Wixii aqoon iyo tababaro uu qaatay,
- Iyo xaadiriskiisa.

Qodobka 19aad ee xuquuqaha ciidanka dab-damiska, inta halkan ku qoran waan ku raacsanahay, balse maaddaama uu yahay shaqsi ka shaqeeya arrimo halis ah, uguma qorna qodobkan wixii dhibaato ah ee soo gaadha iyo xuquuqda uu yeelanayo. Sidaa darteed, laba arrimood oo aad u muhiima ayaan ku dari lahaa:

1. Shakhsi kasta oo ka mid ah ciidanka dab-damiska oo dhaawac ka soo gaadho hawl-gallada halista ah ee uu la dagaalamayo, waxa uu leeyahay xuquuqaha dhaawaca oo ay ka mid yihiin daryeel caafimaad iyo adeegyada kale ee uu u baahan yahay.
2. Inay helaan xuquuqda adeega bulshada, taas oo ah in dadweynuhu ka caawiyo gudashada waajibaadkooda.

Qodobka 37aad ee miisaaniyadda CD, inta guddidu ku soo gudbisay waa kooban tahay, waxayna ku koobtay in miisaaniyadda laga helo dawladda dhexe oo keliya. Sidaa darteed, waxaan qabaa in la qaato sidii qodobkaas ugu qornaa qabyo-qoraalkii xeerka asalka ahaa ee la soo gudbiyay, kaas oo tilmaamayay in miisaaniyaddu ka iman karto dawladda dhexe, dawladaha hoose, bulshada iyo wixii gargaar ama deeqo ah ee soo gaadha.

Qodobka 38aad ee qolka hoggaaminta masiibooyinka heer qaran, guddida heer qaran ee lagu sheegay xarfaheeda D iyo E ee Badhasaabka Gobolka iyo Maayarka Degmada, maaddaama ay heer qaran tahay, isla markaana badhasaabka gaarka ahi aanu caddayn, waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo "Badhasaabada gobollada iyo Maayarada degmooyinka".

Qodobka 24aad waxa uu tilmaamayaa anshaxa; sidaas awgeed xeer-nidaamiye ayaa qeexaya qaabka anshaxu noqonayo, waxaana xeer-nidaamiyaha laga dheehanayaa hab-dhaqanka anshaxa. Waxaan adkaynayaa, maaddaama ay ku qoran tahay mid ka mid ah waajibaadka ama mandaqadda Ciidanka Dab-damiska in ay guryaha bilaa oggolaansho ku geli karaan, isla markaana ay geli karaan meelo halis ah ama xaafado kala duwan, in anshaxa si aad ah loo xoojiyo, ciidankana xagga anshaxa culays gaar ah la saaro.

Qodobka 27aad, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro farqad 7aad oo tilmaamaysa in goob kasta laga helo haamaha dab-damiska, isla markaana lagu rakibo dhisme kasta iyo guri kasta. Sidaas awgeed, waxaan soo jeedinayaa in gawaarida rakaabka ahna lagu rakibo haamahaas, maaddaama aynu ognahay in toddobaadyadii u dambeeyay ay gubteen gaadiid xambaarsan dhar; haddii ay sidaas haamaha u lahaayeen, khasaaruhu wuu yaraan lahaa. Aad iyo aad baad u mahadsan tihiin. Asalaamu calaykum.

**Md. Ibraahim Maxamed Jaamac (Khadar-Guun)** **(11 Min, 51 Sec):** Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wa-barakaatuhu. Maanta waxa aynu ka hadlaynaa Ciidanka Dab-damiska Qaranka, waana ciidan aad ugu muhiim ah nolosheena. Sida aad ka warqabtaan, waxa inagu soo dhacay laba masiibo-dab oo kala ahaa Suuqa Waaheen iyo Suuqa Wajaale.

Waa ciidan la shaqeeya Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Dawladaha Hoose ee hoos yimaada. Sidaa darteed, magaca **Xeerka Ciidanka Dab-damiska iyo Samata-bixinta** waa magac wanaagsan. Samata-bixintu kuma koobna dab oo keliya; marka baabuurta isku dhacaan oo dadku ku dhex xanibmaan, waxay awood u leeyihiin inay ka jarjaraan iyaga oo aan qiimaha gaadhiga eegin, balse qiimaha nolosha dadka tixgelinaya. Tani waa

shaqooyinka dab-damisku ka qabto adduunka oo dhan, kuwaas oo ah badbaadinta nafta bini'aadamka. Samata-bixintu way ka ballaadhan tahay dab oo keliya; qof baa god ku dhaca, qof baa ceel ku dhaca. Sidaas awgeed, Ciidanka Dab-damisku waa inuu yeeshaa qayb ku takhasustay dabaasha iyo quusidda, isla markaana haysta wiishash iyo qalab kale oo dadka godadka lagaga soo saaro.

Qodobka 2aad ee ujeeddada xeerka, waxaan ku dari lahaa farqad 4aad oo cusub oo ah: "In ciidanku yeesho *fire procedure permit*." Maaddaama magaalooyinku sii korayaan, waa in mulkiilaha guriga dhisanaya—nooc kasta oo uu gurigu yahay—marka uu qaadanayo ruqsadda dhulka ee Hawlaha Guud, sidoo kale uu ka helo oggolaansho Dab-damiska, si loo helo *fire access* ay baabuurta dab-damisku kaga geli karaan. Tani waxay ka hortagaysaa wixii dhawaan ka dhacay Suuqa Waaheen oo aan lahayn dariiq ay mari karaan. Sidaas awgeed, qof kasta oo guri dhisanaya waa inuu sida Hawlaha Guud oo kale oggolaansho ka helo Dab-damiska.

Halka abaanduule laga dhigay abaanduule, abaanduuluhu wuxuu hoggaamiyaa ciidan dagaal galaya. Sidaas darteed, anigu waxaan ku dayn lahaa taliye iyo taliye ku-xigeen, waxaana la sameeyaa hawl-galin (*operational management*) dalka oo dhan hagta, degmo kasta wixii ka dhaca. Hawl-galintu waxay maamushaa gaadiidka, shaqaalaha, iyo dhammaan wixii ku saabsan heeganka marka dab qarxo. Taliyaha iyo ku-xigeenkuna ha noqdaan kuwo maamul ahaan u xil-saaran. Sidaas awgeed, abaanduule waan ka saarayaa, waxaana ku raacsanahay xildhibaanadii iga horreeyay.

Inkasta oo aan Ciidanka Dab-damisku si toos ah ugu xil-saaranayn caafimaad, haddana waa inuu yeeshaa qayb *emergency health* ah. Goobta marka ay tagaan, ma aha in dhakhaatiir iyo kalkaaliyeyaal la raadiyo; waa inay awoodaan inay sameeyaan *CPR*, oo haddii qof neeftu ku dhegto ay caawin karaan, isla markaana ay xannibi karaan dhiig-bax ka hor intaan ambalaasku iman. Sidaas awgeed, qaybtaas caafimaad waa lama huraan in lagu daro.

Qodobka 9aad farqaddiisa 7aad, isticmaalka booyadaha dadweynaha: shacabku way geli karaan, sida dhacday maalmihii u dambeeyay, balse waa in la siiyaa shidaalka, waana inay xuquuq yeeshaan. Haddii gaadhigiiba gubto—xitaa hadduu qiimihiisu yahay 40 kun oo doolar—waa in la daryeelaa. Sidaas awgeed, ka-qaybgalka shacabka waa arrin wanaagsan, balse waa in ay helaan xuquuq, magdhow wixii ka soo gaadha, isla markaana la siiyo billad iyo maamuus si loo dhiirrigeliyo.

Sidoo kale, Qodobka 10aad ee isla qodobkaas, dhismayaasha cusub waa in ay noqdaan kuwo la jaanqaadaya *city plan-ka*, lana hubiyaa inay waafaqsan yihiin *fire and safety standards*. Dhisme kasta ka hor inta aan la dhisin, waa in qorshaha lagu daraa qiimayn Dab-damisku sameeyo.

**Md. Cabdilaahi Muuse Cabdi** **(11 Min, 07 Sec):** Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye iyo Xildhibaano, salaan ka dib, inta aanan dooddii gelin, waxaan odhan lahaa saaka runtii waxa aad moodaysay in Golahayagu fawdo ka dhacday, masuuliyaddeennii iyo aragtidii laga qabay Golahana aanay si buuxda isugu waafaqsanayn wixii saaka dhacay.

Marka ay wax qaldamaan, waxaa wanaagsan in sida ugu quruxda badan loo saxo. Haddii Shir-guddoonku u arko arrin saluug leh, ma aha wax qurux badan in lagu dhawaaqo "magaalooyinka kaalaya na maqal", waayo taasi sumcad-xumo ayay ku yeelanaysaa magaca Golaha.

Shir-guddoonku mar walba waa inuu eegaa masuuliyadda guud, isaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo, waana inuu mar kasta gutaa masuuliyaddaas.

Haddii aan dooddii ku soo laabto, runtii marka hore waxaan taageerayaa Khadar-Guun oo yidhi waa in Ciidanka Dab-damisku yeeshaan qayb caafimaad oo *first aid* ah. Inkasta oo aanay ahayn xirfadlayaal caafimaad, haddana waa inay yaqaannaan badbaadinta aasaasiga ah; tusaale ahaan, haddii qof neeftu ku dhegto ama dhiig-bax jiro, waa inay awoodaan inay wax ka qabtaan inta ambalaasku imanayo.

Qodobka 8aad, waxaan ku dari lahaa, maaddaama magaalooyinka loo samaynayo xarumo dab-damis oo waaweyn, in meelaha ay bulshadu ku badan tahay sida suuqyada—Suuqa Waaheen, Suuqa Xisbiga iyo suuqyada kale—magaalo kasta laga sameeyo *sub-station* yar oo Dab-damisku leeyahay, si ay u joogaan laba ama saddex gaadhi oo degdeg uga jawaaba inta xarunta weyn la sugayo, si khasaaruhu u yaraado.

Qodobka 12aad ee shuruudaha lagu magacaabayo masuuliyiinta sida taliyaha, waxa lagu sheegay in da'diisu aanay ka yaraan 40 sano, kana badnaan 60 sano. Maaddaama hawl-gabka shaqadu yahay 65 sano, waa in la sameeyaa xad cad oo u dhexeeya labadaas tiro.

Sidoo kale, waxaan ku dari lahaa in taliyuhu ahaado mid jidh ahaan iyo maskax ahaanba caafimaad qaba, kana madhan balwado sida qaadka, khamriga iyo mukhaadaraadka kale.

Qodobka 17aad farqaddiisa 2aad, shaqaalaha cusub ee la qaadanayo waa in da'doodu tahay ugu yaraan 18 sano, ugu badanna 40 sano, marka laga reebo kuwa khibrad gaar ah loo baahan yahay ee xafiisyo fadhiya. Qofka dab-damiska loo qaadanayo waa inuu awood u leeyahay shaqada adag ee uu qabanayo, isla markaana aanu lahayn balwado.

Qodobka 19aad farqaddiisa 7aad, qof kasta oo ciidan ah oo lagu helo faldambi kama-dambays ah oo lagu xukumo xadhig ciqaabeed, wuxuu waayaa mushaharkiisa joogtada ah iyo xuquuqo kale. Halkan waxaan soo jeedinayaa in xadhigga la xaddido; tusaale ahaan, haddii xadhiggu ka badan yahay lix bilood, arrintu sidaas ha ahaato, balse haddii uu ka yar yahay lix bilood, waa inuu shaqadiisa ku soo noqdaa.

Qodobka 24aad farqaddiisa 2aad, oo sheegaya in xeer-nidaamiye ay Wasaaradda Arrimaha Gudaha soo saarayso si loo fuliyo taliska Ciidanka Dab-damiska, waa in la cadeeyo muddada xeer-nidaamiyahaas la soo saarayo, si uusan uga dambayn saxeexa Madaxweynaha ee xeerka.

Qodobka 32aad ee ka hadlaya is-hortaagga gurmadka degdegga ah ee Dab-damiska, ganaaxa iyo xadhigga lagu xusay—hal ilaa saddex sano ama ganaax lacageed—waxay u muuqdaan in xadhigga la iibsan karo. Waxaan soo jeedinayaa in xadhiggaas aan la iibsan karin, si uusan qofku danbi u galin isagoo og in uu xadhigga iibsan karo.

**Guddoomiye Cali Xaamud:** Aad iyo aad ayaad u mahadsan tihiin Mudanayaal, intii dooday iyo intii dhagaysatayba. Fadhiguna wuxuu xidhmayaa maanta, waxaana dib u furan doonaa maalinta Sabtida.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha W. Shuruucda & H/qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada** |
| ---------------------------------------------------- | ---------------------------------------- |